Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Arrimaha Gudaha,
Federaalka & Dib u Heshiisiinta
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيد را لية
وزارة الداخلية ولشؤون
والفيد رالية والمصالحة
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

*TIX:WAGF&D/XW/ D160/2026* *Tr:22th Mar, 2026*

**Ku**: Maamullada Heer Gobal iyo Heer Degmo ee D/ Gobaleedka Koonfur Galbeed
**Ku**: Guddiga Ogdayaasha dhaqanka ee Koonfur Galbeed Soomaaliya
**Og**: Wasiir ku xigeenka Wasaaradda
**Og**: Wasiirk Dowlaha Wasaaradda
**Og**: Ra'iisul Waasaraha XFS
**Og**: Madaxweysnaha JFS,

WASAARADDA ARR. GUDAHA, FED. & DIB-U-HESHIISI. ITA
22 MAR 2026
BIXID/EXIT

**UJEEDDO: Xil-Haynta Xilalka Maamulada Heer Gobol Iyo Heer Degmo ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya**

**Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta**

**Markuu arkay:** Qodobka 43aad ee Sharciga Lr. 116 ee soo baxay 06/08/2013.
**Markuu tixgeliyey:** Xaaladaha siyaasadeed iyo amni ee ka jirta deegaannada Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya.
**Markuu garwaaqsaday:** In ay muhiim tahay in laga hortago firaaq maamul oo ku iman kara heer gobol iyo heer degmo, iyo sidoo kale in la ilaaliyo xasilloonida iyo sii wadidda adeegyada maamul iyo kuwa bulshada.
**Markuu hubsaday:** In madaxda sare ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed ay ku jiraan muddo dhaaf xileed, una baahan yihiin xal waafaqsan sharciga iyo nidaamka dowladnimada.

Wuxuu caddaynayaa:

1. In dhammaan maamullada heer degmo iyo heer gobol ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya ay sii wataan gudashada xilalkooda sida ay yihiin, ilaa laga soo dooranayo goleyaal cusub oo beddela si waafaqsan sharciga.

2. In Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka Iyo Dibuheshiisiinta Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo la tashanaysa odoyaasha dhaqanka Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya ay si gaar ah ugu xilsaaran

yihiin ilaalinta maamullada dhisan, iyo sidoo kale buuxinta xilalka ka bannaanaada maamulladaas.

Ugu dambeyntii, dhammaan xafiisyada ay khusayso warqaddan oo ay ka mid yihiin Hay'adaha Amniga waxaa la farayaa dhaqangelinta wareegtadan, isla markaana ay ka qaataan kaalintooda ku aadan sugidda xasilloonida maamulka iyo hirgelinta nidaamka dowladnimada.

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Xil. Ali Yusuf Ali-Xoosh**
**Wasiirka Wasaaradda**

Via Tanzania, 888 Building
Email: minister@moifar.gov.so , minister.moifar@gmail.com web. Moifar.gov.so